# Warbixin ku wajahan asxaabta iyo ehelka bukaanka COVID-19 loo keenay isbitaalka

COVID-19 wuxuu keeni karaa xanuun yar, mid daranna wuu sababi karaa.

Waxaa saaxiibkaa/qaraabadaada loo keenay isbitaalka caabuqa COVID-19 awgii sidaan u ilaalino neefsashadooda. Waxaa laga yaaba in loo baahdo in neefsashadoodu lagu kabo oxygen ama lagu xiro ventilator (makiinada naqaska ama neefiye). Waxaa kaloo laga caawin doonaa wixii calaamado kale oo laga helo amaba kusoo korodha.

Waraaqdani waxay kuu faafaahin doontaa daawada la siin doono, iyo caawinaadda u banaan bukaanka iyo adiga.

## Maxaa lagu daawayn doonaa?

Inta ay socoto daawaynta lagula tacaalayo cudurkan waxaa muhiim ah in sidoo kale la yareeyo walwalka uu dareemi karo bukaanka. Tani waxaa suurto galinaysa daawaynta calaamadaha soo socda:

- Neefta - Neefyarida waxaa lagula tacaali karaa in la dajiyo bukaanka, laakiin haddii neefyarida ku sii xumaato waxaan ku caawin doonaa daawayn. Daawada ugu caansan oo loo isticmaalo waa morphine. In kastoo dawadan Morphine ay tahay xanuun baabi'iye islamarkaana waxaa loo isticmaalaa la tacaalida neef yarida.
- Qufaca waxaa sidoo kale lagu yarayn karaa morphine ka.
- Walwalka ayaa badan kara; daawoyinka lagu daaweeyo walwalka waxaa ka mid ah lorazepam iyo midazolam
- Waxaa sidoo kale iman karta nasiino la'aan ay sababto qandhada. tani waxaa lagu xakamayn karaa isticmaalka dawada paracetamol.

Daawo waliba waxaa la siinaya bukaanka si joogto ah iyo markii loo baahdo. Daawada waxaa lagu siin afka, cirbad lagu duro xididka ama maqaarka hoostiisa.

Xaalada Covid-19 ee daran ayaa saameyn wayn ku yeelaan karta shaqada caadiga ee sambabada. Waxaa dhici karta in lagu xiro makiinada neefiyaha si loo gaarsiiyo sambabada taasoo caawinaysa neefsashada. Waxa dhici karta inuu ku xirnaado neefiyaha dhowr maalin ilaa ay sambabada u shaqeeyaan si caadi ah.

## Go'aan qaadasho

Waxaa dhici karta in loo baahdo in kooxda caafimaadka ay go'aano muhiim ah si dagdag uga qaataan ehelkaaga/saaxiibkaaga. Tusaale ahaan, xilliga loo baahan yahay in bilaabo in makiinada naqaska lagu xiro iyo markii loo baahan yahay wadnaha in la soo celiyo garaaciisa markuu istaago. Fadlan la socodsii kooxda caafimaadka hadii aad arrimahan kala hadashay saaxibkaa/qofka qaraabadaada ah iyo waxay ka yiraahdeen. Hadii aadan hubin, fadlan la hadal kooxda dhakhaatiirta mid ka mid ah. In badan xiriirka aad la yeelanayso kooxda dhakhaatiirta waxay noqon doontaa xaga qadka teleefanka waana fahmi karnaa inay adkaan doonto. Fadlan iska hubi inaan hayno macluumaadkaaga oo saxan si lagaala soo xiriiri karo una sheeg shaqaalaha ward-ka hadii aad rabto in lagula socodsiiyo xaaladda bukaanka.

## Sidee baan ula xiriir karaa?

Waxaa jira xeerar kala fogaansho adag oo lagu soo rogay gudaha iyo banaanka isbitaaalka, taasi oo micnaheedu tahay in laga yaabo in aysan suurtagal kuu noqon karin inaad soo booqato bukaanka. Hadii aad soo booqanayso isbitaalka waxaa lagaa rabaa inaad agabka ilaalinta shakhsiga (sida kale loo yaqaano PPE- marada wajiga lagu xirto iwm). Meeshii suurtagal ay tahay, waxay shaqaalaha ward-ka kaala soo xiriiri doonaan qadka taleefanka ama video.

EUROPEAN LUNG FOUNDATION

EUROPEAN RESPIRATORY SOCIETY

Macluumaadkan waxaa isku daba ridday Dr Sabrina Bajwah (Cicely Saunders Institute, King's College London) waxaana si baaxad leh uga qayb qaatay qoraa kale iyo kooxo bukaano/daryeelayaal matala si uu u raaco qoraalka tafaftireed "maareynta baahida daryeel dadka uu saameeyay COVID-19". Please cite this editorial as follows:

Bajwah S, Wilcock A, Towers R, Costantini M, Bausewein C, Simon ST, Bendstrup E, Prentice W, Johnson MJ, Currow DC, Kreuter M, Wells AU, Birring SS, Edmonds P, Higginson IJ (2020). Managing the supportive care needs of those affected by COVID-19. ERJ: doi (10.1183/13993003.00815-2020)

**Produced in April 2020**

## Ma heli karaa caawinaad intaasi dheer?

Waan fahmi karnaa inay tahay waqti adag. Waxaana laga yaabaa Inaad rabto Inaad  dareenkaaga ka hadasho. Fadlan waydii shaqaalaha ward-ka inay kugu xiriiriyaan adeegyada soo socda ee kuu banaan :

Liiska adeegyada caawinaad ee maxaliga ah: